

Helitaanka nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta: Bayaan wadajir ah

Luulyo 25, 2023 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Guddoomiyaha Gobolka Danielle Smith iyo Wasiirka Caafimaadka Adriana LaGrange waxay soo saareen bayaanka soo socda ee warbixinaha ku saabsan goobaha caafimaadka ee xubnahooda ka qaada khidmad lacag ah:

“Waxaan rajaynaynaa in dhakhaatiirta Alberta ay raacaan sharciga, oo uu ka mid yahay *Xeerka Caafimaadka Canada (Canada Health Act)* iyo *Xeerka Caymiska Caafimaadka ee Alberta (Alberta Health Care Insurance Act, AHCIA)*. Dowladda Alberta waxaa ka go’an raacista mabaadii’da *Xeerka Caafimaadka Canada* iyo xaqijinta in goobaha caafimaadka iyo dhakhaatiirtu u hogaansamaan AHCIA.

“Waxaan ognahay in ay jiraan dhakhaatiir iyo goobo caafimaad oo Alberta ku yaala kuwaas oo usoo shaqaynayay tobanaan sanno si waafaqsan habraacyada sharciga ah si ay u bixiyaan adeegyo uusan daboolin qorshaha caymiska daryeelka caafimaadka ee gobolku. Adeegyadan waxaa kamid ah qaliimada aan caafimaad ahaanta loogu baahnayn, adeegyada nafaqada iyo toobinka, warbixinaha caafimaadka iyo daaweynta dhalimada. Qaybta Kormeerka iyo Hubinta u Hogaansamidda sharciga ee Alberta Health waxay qiimayn ku ogaatay in ay jiraan goobo ganacsi oo gaar loo leeyahay oo qaabkan u shaqeeya, kuwaas oo khidmad xubinimo dadka ka qaada gudaha Alberta. Taariikh hore ahaan, dhammaanba qiimaynuhu waxay xaqiijiyeen in goobahan caafimaad ay u shaqeeyaan si waafaqsan xeerka. Alberta Health waxay sidoo kale warbixin sannadle ah usoo gudbisaa Health Canada iyo, ilaa maantana, ma aysan ogaanin wax dhibaato ah oo kajira howlaha goobahan caafimaad.

“Waxaan dhawaantan ka war helnay goobo caafimaad oo xayaysiinaya adeegyo uu daboolo qorshaha caymiska daryeelka caafimaadka ee gobolku waxayna xayaysiinadanu sheegayaan in adeegyadan lagu heli karo xubin noqosho kaddib marka qofku lacag bixiyo. Dowladda Alberta waxay aad uga walaaci doontaa haddii goobtan caafimaadku ay qaadayso khidmado lacageed

si loo helo adeegyada caymiska kujira oo ayna goobta caafimaadku dadajinayso helitaanka dhakhtarka qoyska ayada oo aan dan ka lahayn bukaanada kale taasoo keenaysa in ay muddo dheer sugaan. Waxaanu Alberta Health ku amarnay in ay baaritaan ku samayso goobtan caafimaad ee gaarka ah si ay u xaqiijiso u hogaansamidda dhammaan shuruucda. Haddii u hogaansamid la'aan sharciga ah la ogaado, waxaanu qaadi doonaa talaabada ku haboon.

“Dadka reer Alberta jeebkooda kama bixinayaan lacagta adeegyada caafimaadka ee caymiska kujira sida la kulmida dhakhtarka qoyska ama bookhashada isbitaalka – taasi marnaba isma badalayso.”

Su'aalaha Warbaahinta

Sam Blackett

587-589-6048
Xoghayaha Saxaafada, Guddoomiyaha Xafiiska

Scott Johnston

780-918-4284
Xoghayaha Saxaafada, Health